



Kooxda kubbada laliska ee Wilson High oo xilli ciyaareedka wanaagsan kujirta tartanka PIL

Kooxda laliska ee Dugsiga Sare Wilson waxay xilli ciyaareed wanaagsan kujirta tartanka Portland Interscholastic League. Iyaga oo galaya tartamada asbuucaan, Trojans ayaa durbadiiba qayb ka qaadatay hanashada horyaalka PIL, waana midkoodii ugu horreeyay tan ilaa 2015, waxayna ku dhammeysan karaan guul haddii ay badiyaan labadii kulan ee ugu dambaysay, ee ay gurigooda kula ciyaarayaan Jefferson maalinta Talaadada, iyo Benson maalinta Khamiista.

Xilli ciyaareedka waxay Wilson u tahay tallaabo weyn, kaasoo kaalinta labaad ka gashay PIL waxaana ka badiyay Lincoln saddexdii xilli ciyaareed ee lasoo dhaafay. Trojans ayaa bayaan hore soo saartay Sebtembar 5, markay ka guuleysteen Lincoln 25-20, 25-8, 27-29, 25-19 si ay u afjaraan guusha is xig-xiga ee Cardinal 40ka-ciyaarood ee PIL. Wilson sidoo kale waxay ku guuleystay tartanka celiska oo ay la ciyaaraysay Lincoln waxayna ka badiyeen, 25-17, 25-23, 25-16, gurigooda 3dii Oktoobar

Wilson waxaa hogaaminayaa ciyaar billaabiyaha oo kujirta sannadkeeda afaraad Hannah Romeis, oo dheereerkuda tahay 5-fiit-5 oo ah gooldhaliyaha banaanka kaasoo tuura kubbada waxayna kujirtay kooxdii-koowaad ee gooldhalinta xilli ciyaareedkii lasoo dhaafay, iyo Kennedy Stahr oo 5-fiit-8 ah oo iyadana ah gooldhaliyaha banaanka kaasoo tuura kubbada oo kooxda ku hogaaminaysay gooldhalinta.

Ciyaartoyda kale ee muhiimka u ah Wilson waxaa ka mid ah KaijaShreeve iyo Bryanna Weber, Avery Fraser oo kujirta sannadkeeda labaad, iyo Melia Patrick, oo ah weeraryahan hogaaminaysay weerarka. Trojans waxaa tababaraa Mark Mendak, kaasoo kujira xilli ciyaareedkiisii sadexaad ee Wilson isla markaana ahaa Tababaraha Sanadka ee PIL sanadkii lasoo dhaafay.

Wilson waxay dhowaan kasoo muuqday qormada [OSAAToday oo u diyaariyay Jerry Ulmer](#).